

Oktoobar 2, 2019

Waalidiinta/Wakiilada Mudan,

Waqtigaan lagu jiro oo dhaqaalaha aan la isku hubin oo weliba sii socda, waa inay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego (San Diego Unified School District) sii wado inay raadiso ilo maal-gelin oo suuragal ah si loo taageero shaqadeena muhiimka oo ah in ardaydeena loo diyaariyo guusha.

Impact Aid Funds waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo degmooyinka dugsiyada oo waayo lacagaha canshuurta oo sababteenu tahay ardayda u qoran oo ka imaado qoysaska ku nool ama ka shaqeeya dhismoooyinka dawlada (federal properties) aan canshuurta laga qaadin ama ah kuwa ku jira milatariga. Waxaa dugsiyadeena si aad u saameeyo ardayda xiriirka la leh dawlada.

Impact Aid funds waa qayb ka mid ah miisaaniyada guud ee Degmada Dugsiga ay ku hawlgasho waxayna taageeraan hawlaha wax barashada oo loogu talagalay **dhammaan ardayda** jooga dugsi kasta.

Sida loogu qalmo maal-gelinta Impact Aid, Waaxda Wax Barashada Mareykanka (U.S. Department of Education) ayaa ka rabta Degmada Dugsiga inay sahamin ku sameyso arday kasta si loo go'aamiyo u-qalmintaanka. Sidaa daraadeed waxaan ka codsaneynaa dhammaan waalidiinta inay buuxiyaan foomka sahaminta oo la socda warqadaan oo ay ku buuxiyaan maclumaad khuseeyo ilaa xiliga Oktoobar 2, 2019. Fadlan nagu caawi in aan u qalano maal-gelintaan muuhimada badan.

Si laguu caawiyo:

- Hore ayaan maclumaadka ardayga ugu sii qorney foomka sahaminta.
- Hadii maclumaadku sax yahay, fadlan saxiix iyo taarikhda ku qoran foomka, oo sida ugu dhakhsaha badan u soo celi.
- Hadii loo baahdo saxitaan, fadlan xariiq mari maclumaad kasta aan sax ahayn markaas wixi saxitaan oo lagama-maarmaan ah ku samey booska loogu talagalay. Fadlan waxaad meesha ama meelaha aad saxday ku qortaa labada xaraf oo bilowga u ah magacaaga hore iyo dambe (initial).
- Fadlan hubi in kuli sanduuqyada loo dhammaystiro iyadoo si buuxdo wax loogu faahfaahinaayo (loo-shaqeeyaha [employer], laanta [branch], qaybta [division], magaalada, gobolka, summada boostadaada [zip], iwm.)
- Fadlan ogoow: Loo-shaqeeyaha (employer) la mid ma aha **Dhismoooyinka Dawlada (Federal Property)** (hoos ka fiiri tusaalaha ku qoran)
 - Ka shaqeeya Panda Express (**Loo-shaqeeyaha [Employer]**) oo ku yaalo 32nd St. Naval Base (**Dhismoooyinka Dawlada [Federal Property]**)
- Waalidiinta ama wakiilada ku jira milatariga oona si buuxda oga shaqeeya hadadaan (Actice Duty), fadlan sheeg Laanta Aad Ka Shaqueysid (Branch of Service) iyo Garaadada. Hadii aad ku jirtid **Reserves (Kaydka) ama National Guard (Difaaca Qaranka)** oo dawlada amar ku siiso oo lagugu hawl-gelinaayo, fadlan foomka soo raacsii koobiga amarka lagu soo siiyey. Waad madoobeen kartaa wixi maclumaad oo si shahsiyan lagugu garan karo waxaana maclumaadka noocaan loo yaqaanaa PIV (personally identifiable information).

Waan kaaga mahadcelineynaa iskaashiga aad si dhakhso badan ku soo celineysid foomka oo dhammaystiran. Hadii foomamka la soo celiyo ay bataan, waxaa badaneyso lacagaha uu dugsigeena heli karo. Hadaad qabtid wax su'aal ah, fadlan Xafiiska Impact Aid (Impact Aid Office) kala xiriir 619-725-7593.

Si daacadnimo ah,



Cindy Marten
Koormeeraha Sare